

Qof kasta ayaa isticmaali kara

Afar jeer ayuu jirku ka qaadan og yahay nafaqada birta ee caadiga ah

Kuma jiraan waxyaalo xayawaan ka yimid

Cuntada ayaa lala qaadan karaa

Isticmaal fudud – waxtar badan!

Markaad toonto ayaad qaadan kartaa

Waxtarkeeda waa la caddeeyay

Ma u baahan tahay bir?

Baaritaannadu waxay tusayaan in afartii dumar ah ee ku jira da'di ay wax dhali kareen in laga yaabo in ay birtu ku yar tahay. Dumarka uurka leh iyo kuwa ilmaha nuujiya ayay u fududdahay in ay birtu ku yaraato, laakiin ragga iyo carruurta laftigooda ayay birtu ku yaraan kartaa.

Kooxahan faa'iido badan ayay aminoJern u leedahay marka la barbardhigo biraha caadiga ah ee la qaato.

Calaamadaha lagu garto in birtu kugu yar tahay waxaa ka mid ah daal, wareer, lallabo, tabardarro iyo maqaarka oo caddaada. Ka hor inta aadan qaadan birta waa in aad dhakhtarkaaga ka codsataa in uu cabbiro kaydka birta jirkaaga. Tijaabada ayaa si toos ah u sheegi doonta in aad u baahan tahay bir dheeri ah iyo in kale.

Waa maxay aminoJern?

aminoJern waxay si waxtar leh oo dhib la'aan ah u dhistaa kaydka birta ee jirka, wuxuuna jirku u qaataa si afar jeer ka wanaagsan biraha kale ee caadiga ah. AminoJern caadi ahaan ma keento waxyaallo danbe oo dhib leh sida lallabbo, shuban ama caloosha oo adkaata. Markii aad doonto ayaad qaadan kartaa, cuntada ayaadna la qaadan kartaa. Sida biraha kale ee caadiga ah cuntadu kama hor istaagto qaadashada jirka. Waxtarkuna waa isku mid mar kasta. Waxaa kale oo jira in aanay aminoJern ku jirin wax xayawaan ka yimid, qof kastana wuu isticmaali karaa.

Sidee ayay u shaqaysaa aminoJern?

AminoJern waxaa ku jiro isku-dhis bir ah oo khaas ah, Ferrochel. Waxaa ku jira mulukiyyul bir ah, oo ay ku wareegsan yihiin labo aamino-aysiidh, midba dhinac. Waxay sameeyaan wax loogu yeero dipeptid. Marka aad qaadato aminoJern wuxuu jirku garanayaa dipeptid-ka. Xiidmaha ayaa si fudud u qaata dabadeedna birtii ayaa "raacda". Markii ay gudaha galaan ayay aamino aysiidhku kala baxaan markaana birtii ayaa diyaar u noqota in la isticmaalo. Sidaas ayaana birta si wanaagsan loogu isticmaalaa iyada oo aanu caloosha dhib kaa soo gaarin.

Yaa isticmaali kaara aminoJern?

- Dadka aan doonayn waxyaalaha xayawaanka ka yimid
- Dumarka ku jira da'di ay wax dhali kareen
- Dumarka uurka leh iyo kuwa carruurta nuujiya



- Dadka dhiigga ku deeqa
- Ciyaartooyda
- Dadka is caataynaya
- Carruurta koraya
- Dadka ay ku adag tahay in uu jirkooda bir qaato pH-ga caloosha/xiidmaha dartiis
- Dadka dhibka kala kulma noocyada kale ee biraha ah oo ku shubma ama caloosha ku adkaato ama kala kulma dhibaatooyinka kale ee caloosha asiiba
- Dadka aan birta caadiga ah ka helin waxtarkii ay doonayeen
- Isticmaalkeedu waa mid ammaan ah

Isku-dhiska birta ee xaquuqdiisu xafidan tahay (patenterte) ee Ferrochel waxaa sameeyay xaquuqdiisuna u xafidan tahay Albion Laboratories Inc. USA.

Ferrochel cilmi ahaan ayaa loo caddeeyay iyada oo lagu caddeeyay cilmibaaris badan ha ahaato mid lagu sameeyay waxtarka, waxyeellada danbe iyo in aanay dhaawac geysan. Ferrochel waxay haysataa aqoonsiga GRAS taas oo micnaheedu yahay in Food and Drug Administration ee USA ay isku-dhiskaan birta ah u arkaan mid ammaan ah oo aan dhaawac geysanayn.

Sidee ayaa loo isticmaalaa aminoJern?

Kaniin u dhigma 25 mg maalinti

Goojo kale kaddib marka uu dhakhtar taas ku taliyo

Kaniinka waxaa lala qaadan karaa cuntada mar kalena waa la qaadan karaa

Muddo intee dhan ayaa waxtarkeeda lagu gartaa?

Tani waxay ku xiran tahay xaaladdaada. Haddii ay birla'aantu tahay mid caadi ah waxay caadi ahaan qaadanaysaa 4-6 toddobaad ka hor inta aan waxtar la dareemin.

Maxaa loo baahan yahay in aad si gaar ah ula socoto?

Hemokromatose waa wax la kala dhaxlo halkaas oo bir badan laga qaato cuntada, taas oo aanu jirku qaadan karin ama ka faa'iideysan karin ama iska saari karin. Sidaas darteed waa in aad cabbirtaa kaydkaaga birta ka hor inta aadan bir qaadan, si aad u ogaato in aad bir u baahan tahay iyo in kale. Kaydka birta iyo heerka hemoglobin-ka waxaa kaa cabbiraya dhakhtarkaaga.

aminoJern kuma jiraan guluteen, sonkor, caano iyo waxyaalo xayawaan ka yimid midna.

